



Ammaan, Xasilooni iyo Wacnaan uu Helo Ilmo Kasta

Waxa Aanu Nahay Xirfadleyaal Wacnaan Ilmo

- Si joogto ah ayaanu u raadinaa fiicnaanta ugu sareysa.
- Waxa aanu garanaynaa muhimadda bixinta adeegyo leh waxtar oo lagu helo wakhti haboon.
- Waanu is qiimeynaa, is taageernaa oo is ixtiraamnaa.
- Waxa aanu ku faanaynaa in aanu fiicneyno tayada nolosha ee qoysaska bulshadeena.
- Dhaqaale ahaan waxa aanu nahay xilkas.
- Waxa aanu u hanqaltaagnaa in aanu dhaqan ahaan noqono kuwo xirfad leh.

Waxa Aanu Sharafnaa Qoysaska

- Waxa aanu ixtiraamnaa awoodaha qoysaska.
- Waxa aanu fahamsan nahay in qoysasku khubaro ku yihiim waayahooda.
- Waxa aanu garanaynaa in caruurta sida ugu fiican loogu adeego gudaha qoyskooda iyo bulshadooda.
- Waxa ay waalidku sameeyaan waxa aanu ka soocnaa waxa ay yihiin.

Waanu Qiimevnaa Ilmo Kasta

- Waxa aanu ixtiraamnaa qofnimada ilmo kasta oo aanu u adeegno.
- Waxa aanu u doodnaa ammaanka, xasiloonida iyo wacnaanta ilmo kasta.
- Waxa aanu sharafnaa qoyska iyo dhaqanka ilmo kasta.

Waxa Aanu Qiimeynaa Shuraakonimada

- Qoysasku waxay xaq u leeyihiin inay qayb ka ahaadaan kooxda go'aan-gaadhista.
- Shaqo kiis ayaa ah hawsha ugu muhiimsan ee kooxda hay'adda.
- Qoysaska, beelaha iyo dawladda ayaa wadaaga mas'uuliyada in caruurta ahaadaan ammaan.

Si Aad u Soo Sheegtid Xumeyn ama Dayacaad Ilmo oo la Tuhunsan Yahay, Soo Wac Adeegyada Caruurta ee Degmada Franklin County
Khadka Xumeynta Ilmo ee ah 24-Saac (614) 229-7000

Macluumaad Guud
(614) 275-2571

Korsasho
(614) 341-6060

Xuquuq Macaamiil
(614) 275-2621

Ehel
(614) 341-6161

Xafiiska U-hadleyaasha ama Codsiyada Qoraalo
(614) 275-2523

Tabaruceyaasha iyo Caqli-celiyayaasha
(614) 275-2690

childrenservices.franklincountyohio.gov
Hadafkayaga

Iyada oo iskaashi lala yeelano qoysaska iyo bulshada, waxa aanu u doodnaa ammaanka, xasiloonida iyo wacnida ilmo kasta ee aanu ugu adeegno hab sharfaya qoyska iyo dhaqanka.



Franklin County
Children Services
Protecting Children by Strengthening Families
855 W. Mound St. Columbus, OH 43223


Badbaadinta Ilmaha Inta la Xoojiyo Qoysaska



Franklin County
Children Services

ADDEEGYADA CARUURTA

Badbaadinta ilmaha inta la xoojiyo qoysaska



Ku Saabsan Adeegyada Caruurta ee Degmada Franklin County

Adeegyada Caruurta ee Degmada Franklin County waxay maalin kasta arkaan caruur noloshoodu halis ku jirto. Hay'adda waxa sharcigu u xilsaaray inay badbaadin, daryeel iyo xasilooni siiso caruurta la xumeeyay, la dayacay ama aan isku filnayn.

Adeegyada Caruurta waxay rumeysan yihiin muhimadda qoyska waxana ay ku dedaalaan in qoyska oo dhan laga qaybgaliyo xalinta dhibaatooyinka hor keenay hay'adda. Waxa tan la sameeyaa iyada oo la isticmaalayo illo iyo adeegyo balaadhan oo kala duwan, oo ay ku jiraan:

➤ Baadhitaan lagu sameeyo warbixinnada xumeynta iyo dayacaadda ee soo gaadha **Khadka Xumeynta Ilmaha ee 24-Saac: 614-229-7000.**

➤ **Shaqale bulsho iyo xirfadleyaal kale** si loo caawiyo caruurta iyo qoysaska.

➤ **Shuraakanimo iyo Ka-qaybgal bulsho** oo lala yeesho hay'adaha iyo ururada degmada si loo bixiyo adeegyo iyo taageero.

Illo iyo adeegyo dheeraad ah iyo waliba munaasabado bulsho iyo macluumaad barnaamij oo laga heli karo:

childrenservices.franklincountyohio.gov

Caawinta Caruurta iyo Qoysaska

Adeegyada Caruurta waxay meesha u soo galaan si loo sugo amn aanka caruurta ama si qoyska loo caawiyo inta lagu jiro qalalaase. Hadafku waa in caruurta ahaato ammaan oo la xoojiyo qoysaska.

➤ Daryeel Qoys

Haddii ilmaha si ammaan ah loogu hayn karo guriga, FCCS waxay qoyska kala shaqeeyaan qorshe si loo xaliyo dhibaatooyin keenay inay hor yimaadaan hay'adda.

➤ Ehel

Waxa laga yaabaa in caruurta loo heli karo xubno qoyska ka tirsan ama saaxiibo qoys oo gargaar ka geysan kara daryeelkooda gaar ahaan wakhtiyada ay baahi jirto.

➤ Daryeel Korin

Marmarka qaarkood caruurta waxay u baahan yihiin in si ku-meelgaadh ah looga kaxeeyo gurigooda oo lagu meeleeeyo daryeel korin. Adeegyada daryeel korin waxa bixiya hay'ado beeleed oo shuraako nala ah.

➤ Korsasho

Haddii aan la xalin karin dhibaatooyinka qoyska, waxay FCCS weydiisan doonaan hayn ilmo oo joogto ah waxana ay ku meeleyn doonaan cid korsanaysa.

➤ Tabaruceyaal iyo Caqli-celiyeyaal

Badanaa tabaruceyaal iyo caqli-celiyeyaal ayaa qoysaska iyo caruurta ku gargaara hagid iyo taageero dheeraad ah.



Bulshada oo Lala Xidhiidho

Adeegyada Caruurta ee Degmada Franklin waxay badbaadiyaan oo daryeelaan caruurta iyo qoysaskooda iyada oo la adeegsanayo shuraakooyin beeleed oo badan. Barnaamijyada qaarkood waxay gaar u yihiin qoysaska halka kuwo kale ay ka soo qaybgalayaan beesha iyo shuraakooyinka oo dhan.

➤ **Qoyska ka Qoys** – waa shuraakanimo lala yeesho guryaha dejinta si loo caawiyo qoysaska iyaga oo dhex jooga beelahooda

➤ **Shuraakooyin Bulsho** – waxay heshiisyo qandaraas la galaan in ka badan 100 urur si loo caawiyo caruurta iyo qoysaska

➤ **Munaasabado Gaar ah** – waxa ku jira hawlo baraarujin beeleed, bandhigyo iyo khudbado



Ka-qaybgalinta Qoysaska

Go'aamo Lala Qaato Qoysaska

Waxa qoysaska sida ugu fiican loogu adeegi karaa marka ay gargaar ka geysan karaan in la garto arrimaha ku ah caqabad laguna daro soo saarista qorshaha u adeegistooda. Inta lagu jiro hawsha, waxa qoysaska lagu dhiirigaliyaa inay qayb ka noqdaan kooxda oo ka qaybgalaan go'aan gaadhista.

Xasilooni Loo Helo Caruurta

Ilmo kasta wuxu istaahilaa guri xasiloon oo joogto ah. Xasiloonidaasi waxay yeelan kartaa qaabab badan.

- Qoyska u Dhalashada oo Lala Mideeyo
- Ehel
- Korsasho
- La-xidhiidhin Qoys Korin oo Sii Socota
- Xidhiidhyo Beeleed

Kuwaas waxay dhammaantood qofka dhaliyarada ah siin karaan taageero ah noloshu oo dhan.

